



## **QORSHEYNTA GUUD EE DHAMMEYSTIRAN**

### AXDIGA GUDDIDA QORSHEYNTA GUUD EE DHAMMEYSTIRAN

#### **Doorka iyo Ujeedadda**

Guddida Qorsheynta Guud ee Dhammeystiran waxa ay tallo-bixin siin doonaan Kooxda Mashruuca sidii ay u horumarin lahaayeen qorshe dhammaystiran, loo siman yahay, aragtii si dhab ah loola wadaagay guddiyada iskuulada naqshadeynta dugsiyada. Kooxda Mashruuca ee degmadu waxa ay si toos ah ula shaqeyn doonaan Guddida Qorsheynta Guud ee Dhammeystiran sidii loo xaqijin lahaa in la fahmo lana tixgaliyo dareenadooda iyo higsigooda.

Guddida Qorsheynta Guud ee Dhammeystiran waxa ay qeyb ka noqon doonaan qorsheynta tixgalin leh oo kala gedisan, iyaga oo ka qeyb qaadan doona danneeyaasha hab socodka Dugsiyada Degmada iyo shaqaalaha Dugsiyada Degmada, ardayda, iyo waliba koox la taliyaal dhinaca naqshada ah; hab socodkani wuxuu tixgalin siin doonaa inay ka mid noqoto dokumentiyo asal ah oo hagi doona, dhismaha, goobta, shuruudaha maamulka iyo miisaaniyada loo isticmaalayo qiimeyn ta ikhtiyaaradka qorshaha fikrada guud.

Mas'uuliyada iyo doorka xubnaha Guddida Qorsheynta Guud ee Dhammeystiran:

- Ka qeybgalka shirarka laqula talinayo kooxda mashruuca ee khuseeyana bulshada iskuulka, arrimaha taagan, himilooyinka iyo higsiga.
- U hoggaansanaanta xeer-hoosaadka Guddida Qorsheynta Fikrada Guud .
- In ay ka warbixin iyo warcelin u keenaan kooxaha iyo hay'adaha ay xubnaha Guddida Qorsheynta Guud ee Dhammeystiran ay wakiilkka ka yihiin.

#### **Aasaaska Mashruuca**

Habraaca qorsheynta guud ee dhammeystiran wuxuu xaqijin doonaa baahiyaha mashruuc ee ay u baahan yihiin iskuul kasta, naqshada goobta, iyo qiyastii qiiimaha ay ku kacayso sidii dib u cusbooneysiin loogu sameyn lahaa dhismayaasha taariikhiga ah marka la garab dhigo in la dhiso dhismo cusub. Ujeedadda qorsheyntani waqtiga hore ahi waa dadaal la rabo sidii loo heli lahaa qiyasta qiiimaha sugar ee ay ku kacayaan dib u cusbooneysiinta ama in dib loo dhiso iskuulkaasi. Xogtani sidoo kale waxa ay Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) ka caawin doontaa sidii ay u qorsheynta lahaayeen ku talo-galka dhaqaalaha maalgalineed ee mustaqbalka. Waqtigan xaadirka ah jadwalka dib u cusbooneysiinta ama dib u dhiska iskuulada oo dhammeystiran lama go'aamin. Taasi oo uu ku xirnaan doonta qorshaha miisaaniyada mustaqbalka dhismaha iskuuladu. Marka xaalku halkaasi marayo, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay sii wadi doonaan in waqtigii iyo tallooyinkii ku haboonaa Qorshayaal Guud ee Dhammaystiran dhinaca naqshada iyo dhismaha oo iyaguna noqon doona tallaabada xigta.

Waxaa la sameyn doonaa dadaalo lagula xiriirayo xubnaha bulshada taasi oo caawimo ka geysan doonta horumarinta qorshaha guud ee dhammeystiran. Waxaa sidoo kale fursad u heli doono in ay ku soo biiraan Guddida Qorshaha Guud ee Dhammeystiran xubnaha bulshada ee dugsiyada sarre oo qeyb ka noqon doono habsocodka lagu taageerayo kooxda naqshada iyo shaqaalaha meel marinaya himilada, barnaamijyada iyo afkaaraha iskuul kasta.

Guddida Qorshaha Guud ee Dhammeystiran waxa ay ka koobnaan doontaa waalidiin, macalimiin, iyo daneeyaasha bulshada oo si wada jir ah u wada shaqeynaya sidii ay uga caawin lahaayeen inay siiyaan warcelinta laga soo bixiyey horumarinta qorshaha guud ee dhammeystiran. Xubnaha Guddida Qorshaha Guud ee Dhammeystiran waxa ay isku gudbin doonaam warcelintii bulshada iyaga oo la wadaagi faahfaahin ballaaran ee mashruuca



bulshada inteeda kale. Maadaama ayna Guddida Qorshaha Guud ee Dhammeystiran ay go'aan ka gaaris lahayn, waxa sidoo kalena muhiim ah warcelintooda sidii loo sameyn lahaa naqshada ay ku wada faraxsan yihiin dhammaan bulshadu.

### **Xubnimada**

Xubnaha Guddida Qorshaha Guud ee Dhammeystiran waxa la rajeynayaa inay ay shaqeyn doonaan ilaa 2 bilood inta uu socda wajiga qorsheynta guud ee dhammeystiran.

Shaqaalaha Dugsiyada Degmadu waxa ay xubnaha Guddida Qorshaha Guud ee Dhammeystiran ku dooran doonaan iyaga oo magacaabi doona nidaam la soo codsanayo ka mid noqoshadooda oo cid walba u furan. Waxaa suurtagal ah la qorto codsadayaal dheeraad ah sidii ay u xaqiijin lahaayeen dheelitirka iyo sidii ay dhammaan bulshada iskuuladu uga wada muuqan lahaayeen xubnaha.

Guddida Qorshaha Guud ee Dhammeystiran waxa ay magacaabi doonaan Guddoomiye ama Guddoomiye-xigayaal kuwaasi oo ka caawiya arrimaha shirarka lagaga hadlayo Guddida iyo iyaga oo dib u eegis ku sameeya waxyaabaha la soo bandhigo, hoggaamiyaha shirarka qorsheynta iyo shirarka hab-maamuuska. Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Guddida Waxbarashada PPS waxa suurtagal ah in aanay guddoomiye iyo guddoomiye-xigeenka ka noqonin guddidani.

Guddida Qorshaha Guud ee Dhammeystiran waa in ugu yaraan uu xubin ka noqdaa kooxaha daneeyasha ee soo socda: waalidiinta iskuulka, waalidiinta dariska, ururada dariska, ururada ganacsatada, barnaamijka iskuulka, ka qeybgalayaasha la filayo ee goobta iyo ama/kuwa dhaqaale ku caawinaya, ardayda, iyo macalimiinta, intaasi waxaa dheer wakiilada golaha waxbarashada.

Xubinta rabta in ay iska casisho xubinamadeeda Guddida Qorshaha Guud ee Dhammaeystiran waa in ay ku soo gudbisaa qoraal ahaan kaasi oo ay u gudbinayaa maamulaha mashruuca ee Dugsiyada Degmada; waala aqbalayaa shaqo ka tegistaa haddii aad email ku soo dirto.

Haddii xubin ka mid ahi guddidani ay ka soo qeybgali weydo labo fadhi oo isku xigga iyada oo aysan keenin caddeyn maangal ah, ama haddii kaleba ay noqoto in ayna ka shaqeyn karin guddidani, maamulaha mashruuca Degmadu waxa uu ku baaqi doonaa in xubimadaasi ay bannaan tahay ee guddida, isaga oo magacaabi doona qofkii ku habboonaa ee buuxin lahaa booskaasi bannaanaaday.

### **Qaabka iyo Jadwalada Shirarka Guddida Qorshaha Guud ee Dhammeystiran**

- Qiyaasta ballanqaadyada waxaa ka mid ah: Sanad-dugsiyeedka 2019-20 waxaa dhici doono afar shir oo Guddida Qorshayaasha Guud ee Dhammeystiran yeelan doonaan. Waqtiyada shirarkani dhici doonaan waa in ay la jaan qaadaan guud ahaan jadwalka mashruucyada iyo iskuulada kale iyo waliba ka qeybgalayaasha daneeyasha dugsiyada degmada.
- Wuxaan fiirisaa jadwalka shirarka ee Guddida Qorshaha Guud ee Dhammeystiran ee halkan ku lifaaqan.



Goobaha uu ka dhici doona shirarka Guddidu waxa uu ku lifaaqan yahay Jadwalka Shirarka Guiddida.

Shirarka Guddidu waxa ay u furan yihii dadweynaha, iyada oo fursad la siinayo dadweynaha lana soo dhaweynayo wixii aragtii ay ka qabaan; waxyaabaha shirarka lagaga wada hadlay iyo qoraalada shirarka oo lagu soo daabici doono online.

Waxaa la siin doonaa dadweynaha fursad ay kulan kasta ay faaladooda kaga jeediyaa shirarka marka uu dhammaado kulan kastaa. Faalada dadweynaha waxaa lagu xadiday inay qaadato waqtii dhan 10 daqiqiyo iyada oo lagu daro ugu badnaan 3 daqiqiyo cadeynaha qof kasta. Kuwa raba in ay u soo bandhigaan maragfurkooda Guiddida waxa looga baahan doonaa inay ay iska isdiiliwaangaliyaan shirka. Maragfurku wuxuu dhici doonaa marka aad timaado. Shir kasta waxaa la bixin doonaa kaadhadh lagu qorayo faalooyinka. Waxaa dadweynaha lagu dhiirigalinayaan inay faalooyiin qoraal ah u soo gudbiyaan Guiddidani.

### **Kooxda Mashruuca**

Kooxda mashruuca ay ka koobnaan doonaan naqshadeeyaal, injineero, qorsheeyaal, Maamulaha Xafiiska Dib u cusbooneysiinta Iskuulada iyo shaqaalaha waaxyaha. Iyaga ayaa soo bandhigi doona qodobada shirarka soona lagaga wada hadlayo kuna sameyn doona bandhig, tixgaliyaasha dhismaha; sidoo kale kooxda mashruucu waxa ay fudeydin doontaa wada hadalada lagaga arrinsanayo, waxa ay ururin doonaa wixii talo la soo jeediyo in lagu biiriyo, waxa ay eegi doonaa ikhtiyaaraadka guiddida u furan iyaga oo horumarin doona sidii ay u kala hufi lahaayeen hawlahaaasi oo dhan.

Maamulaha Xafiiska Dib u cusbooneysiinta ayaa xudunta Degmada ee mashruuca lagala soo xiriirayo, isaga ayaa kor jooge ka noqon doona shirarka guiddida iyo munaasabadaha ay dadweynuhu kaga qeybqaadanayaan. Dhammaan wixii xiriir ee ka imanaya xubnaha guiddida ee ka baxsan kulanada guiddida waa in ay u lagala xiriiraa maamulaha mashruuca ee PPS.

Go'aanada mashruuca waxaa ka mas'uul ah Xafiiska Dib u cusbooneysiinta Iskuulada oo la kaashaneysa Hoggaanka Dugsiyada Degmada kolba sidii loogu baahdo. Xubnaha Guiddidu shaqada ay qabanayaa waxa kaliya ay tahay kaalin la talin, iyaga oo aan ahayn wakiilo rasmi ah oo Degmada.